

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Baarlamaanka Dowlad Goboleedka
Galmudug

Xafiiska Guddoomiyaha



Federal Republic of Somalia
Galmudug State Parliament
Office of the Speaker

جمهورية الصومال الفيدرالية

المجلس التشريعي لولاية جلمدج

مكتب الرئيس

Tix: XGBGM/004/20

Tar: 26 February 2020

Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug Dhusamareeb.
Ku: Madaxweyne ku-xigeenka Dowlad Goboleedka Galmudug Dhusamareeb.
Og: Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha Galmudug Dhusamareeb
Og: Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda & Warshadadaha DGGM Dhusamareeb

Ujeedo: Ansixinta Miisaaniyadda 2020 ee DGGM.

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kugu wargelinayaa in Golaha Sharci Dejinta DGGM go'aan ka gaaray ansixinta Miisaaniyadda 2020, taas oo dhan \$ 17,230054.00, wuxuuna Goluhu Kalfadhigiisa 1aad, Fadhigiisa 15aad, taariikhda 26 February 2020, kana dhacay Xaruntiisa Caasimadda Dowlad Goboleedka Galmudug ee Dhusamareeb ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sida hoos ku xusan:

- Xildhibaanada Oggolaaday: 64 (lixdan iyo afar Xildhibaan).
- Xildhibaanada diiday: 0 (eber Xildhibaan).
- Xildhibaanada ka aamustay 0 (eber Xildhibaan).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 33-aad ee Dastuurka DGGM farqadiisa 1-aad xarafkiisa A iyo G, ee qeexaya waajibaadka ka saaran Golaha Sharci Dejinta ansixinta miisaaniyadda iyo meelmarinta xisaab xirka sanadka, sidaas darteed waxaan kaa codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku meelmariso Xeer-Madaxweyne, si uu u noqdo sharci looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlad Goboleedka Galmudug, sida waafaqsan Qodobka 66aad ee xeer-hoosaadka golaha oo qeexaya habraaca loo marayo ansixinta miisaaniyadda iyo meelmarinta xisaab xirka sanadka.

Aniga oo huba in aad ka gudan doonto waajibkaaga Dastuuriga ah, nooga guddoon magaca golaha salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal
Guddoomiyaha Baarlamaanka DGGM



Tell: +252 61200500/ +252 614353333

E-mail. speaker@galmudugparliament.gov.so

Website: www.galmudugparliament.gov.so